

# Kaarka amaahda adiga ku gaarka ah

Waa inaad kaarka amaahda na tusta markii aad doonayso inaad wax maktabada ka amaahato. Kaarka amaahda lacag la'aan ayaa lagugu siin karaa laakinse waa inaad na tustaa kaarka aqoonsiga adiga ku gaarka ah.

Kaarka amaahda waa shay qiimo leh. Sidaas awgeed, adiga ayaa mas'uul ka ah wixii kaarkaaga lagu amaahdo. Haddii u ka lummo waa inaad na wargelisaa kaddib waxaan ciribtiraynaa waxtarkiisa. Qiimaha kaarka cusub waa 20 karoon.

## Mudada amaahsashada

Mudada amaahsashada caadi ahaan waa 28 maalmood. Mudada amaahsashada ee wargeysyada iyo filimada\* sidaas uma badna siiba markii saf loogu jiro.

Farin xasuusin ah ayaa ku soo diraynaa dhowr maalmood ka hor dhammaadka mudada amaahsashada. Qaabka lagugu xasuusin doono adiga ayaa kala dooran kara, waxaan kugu xasuusin karnaa sms, e-mail ama warqad.

## Dib u amaahsashada

Haddii aad doonayso inaad dib u amaahato waa inaad noo la soo xiriirtaa, ama adeegsataa bogga adiga ku gaar ah ee loo yaqaanno "Mina sidor". Ugu badnaantii 2 jeer ayaa amaahan kartaa. Filimada\* 1 jeer ayaa amaahan karta.

## Saf u gelida

Haddii aad doonayso inaad buug saf u gasho, nala soo xiriir kaddib waan ku diiwan gelin doonaa, ama laf ahaan taada ka ballan qabso adigoo adeegsanaayo bogga shabakadda internetka adiga ku gaar ah "Mina sidor". Farin ayaa ku soo diri doonaa markii buugga aad amaahan karto. Waxaan ku soo diri doonaa sms, e-mail ama warqad. Farinta waxaa ku qoran taariikhda ugu dambayso oo aad buugga soo qaadan karto.

## Kharashka la soo daahida

Haddii aad dib u soo celinta la soo daahdo waa inaad kharashka la soo daahida bixisaa:

|  |                  |
|--|------------------|
| Buugagga, cajaladaha-cd ama wargeysyada: | 1 kar/maalintii  |
| Filimada*:                               | 10 kar/maalintii |
| Wax hawada laga amaahdo:                 | 10 kar/maalintii |

Haddii dayn 100 karoon ka badan lagugu leeyahay wax ma amaahan karti ama saf ma geli kartid.

## Kharashka wixii aan la soo celin

Haddii wixii aad amaahatay ay jabaan ama lummaan waa inaad bixisa magdhowgooda. Ugu yaraan:

|                         |         |          |         |
|-------------------------|---------|----------|---------|
| Buugagga dadka waawayn: | 200 kar | Dvd:     | 400 kar |
| Buugagga carruurta:     | 110 kar | Cd:      | 150 kar |
| Buugagga codka:         | 200 kar | Wargeys: | 50 kar  |

\* Da'da amaahsashada waa in ay 15 sano ka hoosayn